

Mabaadii'da iyo Ku Dhaqanka Federaalka

Qoraal uu u'Diyaariyay Prof. Kurt Nuspliger Xafiiska Raysal Wasaaraha ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, ayna kaalmeysay Safaaradda Switzerland.

September 2015



Schweizerische Eidgenossenschaft
Confédération suisse
Confederazione Svizzera
Confederaziun svizra

Embassy of Switzerland to Somalia

NC

Nuspliger Consulting
Beratungen für den
öffentlichen Sektor

Prof. Dr. iur. Kurt Nuspliger
Brunnadernstrasse 30
CH-3006 Bern

M +41 79 432 08 21
F +41 31 351 50 07
office@nuspliger.ch

www.nuspliger.ch

B. Federaalka

Waxaa jira nidaamyo federal oo ballaaran kalana duduwan oo ka shaqeeya caalamka daafihiisa maanta. Nidaamyadaa kala duwan, ma jiro mid ama hab federal oo ka wanaagsan kuwa kale, ma jiro qaab federal oo la odhan karo kana ugu “wanaagsan” ku dhaqankiisu oo caalamka oo dhan ka meel mari kara. Arrimo siyaasadeed, bulsho, taariikheed iyo kuwo kale ayaa qaabeeya hay’adaha federaalka iyo hababka uu u shaqeeyo. Arrimahaa ama shuruudahaa dalba dalka kale wuu kaga duwan yahay. Haseyeeshee, qaabka asaasiga ah ee nidaamyada federaalku maanta, waa isku mid meel walba. Wuxuu khuseeyaa fulinta, sharci-dejinta iyo garsoorka labada heer ee xukuumadda federaalka ah iyo iyo xukuumadaha dawladdaha xubinta ka ah federaalka. Waa qaab isgu jira laba heer oo dawladeed. Wuxuu isku isku daraa heerka qaranka ka hooseeya (sub-national) ee “is-xukunka” (“self rule”) iyo, marka la gaaro heerka qaran, “xukun-wadaagga”¹ (“shared-rule”) u dhexeeya xukuumadda federaalka ah iyo xukuumadaha xubnaha dawladdaha xubinta ka ah federaalka. Dawlad walba oo xubin ka ah federaalku waxay leedahay xilalkeeda mucayinka ah (is-xukun). Dawladaha xubinta ka ah federaalku waxay ka qayb qaataan nidaamka go’aan gaarista ee heer federal (xukun wadaagga).

Sida loo hebeynayo awoodda waxaa lagu qoraa dastuurka isagoo awoodaha u kala cayima si “qotton” ah (“vertical”) iyo si “gudub” ah (“horizontal”). Heer walba oo xukuumadeed wuxuu leeyahay madaxbannaanidiisa ama is-xukunkiisa siyaasadeed iyo maamul ee u gaarka ah ee loogu cayimay meelaha uu ka talinayo (areas of competence). Madax-bannanidaa waxaa mar walba loo adeegsanayaa in ay ka faa’iideystaan muwaadiniinteeda iyo horuumarkeeda. Dawladda federaalka ah waxaa kaloo looga baahan yahay in ay dhiiri geliso wanaagga iyo danta guud ee federaalka iyo in ay isku wado qaybaha ka hooseeya heerka qaran. Maadaamaa ay tahay unug ka tirsan federaalka, dawladda xubinta ka ah federaalku, waxay ka qayb qaadataa sameynta iyo hirgelinta sharciga xukuumadda federaalka ah².

Nidaam walba oo federal wuxuu leeyahay habab uu ku sahlo iskaashiga xukuumadaha³ ee u dhexeeya xukuumadda federaalka ah iyo xukuumadaha dawladdaha xubinta ka ah federaalka, iyo habab uu ku xalilo khilaafaadka xukuumadaha ka dhex oogma. Maxkamadda Dastuurku waxay leedahay awood gaarka ah oo ay ku dhegeysato, go’aanna kaga gaadho kiisaska la xiriira khilaafaadka u dhexeeya xukuumadda dawladda federaalka ah iyo xukuumadaha dawladdaha xubinta ka ah federaalka⁴.

Habka xukunka hoos loogu daadejiyo/furfuro ee loo yaqaan ‘devolution’ku waa habka ugu sarreeya xukun furfurista dalalka, sababtoo ah habkaasi wuxuu ku wareejiyaa awoodaha, xilalka iyo imkaaniyaadka maaliyadeed hay’ado dadweynuhu soo doorteen, oo kuma wareejiyaan unugyo maamul⁵. Federaalada markaad eegto hay’adaha dadweyne waa dawlado leh dastuuradooda u gaarka ah, sharci dejintooda gaarka ah iyo maamuladooda u goonida ah⁶.

Koox khubaro federal oo reer Switzerland ah ayaa sameeyay “Hagitaano la Xiriira ku Dhaqanka Federaal ee Wanaagsan”⁷ (“Guidelines for Good Federal Practices”). Fikradda ka danbeysa hagitaanadaasi waa in la sameeyo mabaadii’da horseedi kara xukun federal oo caadil ah, loo siman yahay isla markaana wax ku ool ah oo caalamkoo dhami adeegsan karo. Hagitaanadaa waxaa loogu tala galay in ay caawimaan dadka sameeya dastuurada, saraakiisha dawladda, xubnaha bulshada

¹ Watts/Blindenbacher, Federalism in a Changing World – Learning From Each Other – A Conceptual Framework for the International Conference on Federalism 2002, p.23-25.

² Koller/Thurer/Dafflon/Ehrenseller/Pfisterer/Waldmann, Principles of Federalism, Zurich/St.Gall 2012, p.15.

³ J.3 Xiriirka iyo Iskaashiga Dawladaha ka Dhexeeya.

⁴ Dastuurka ku Meel Gaarka ee Somaaliya , tarjumaddii aan rasmiga ahayn ee la ansixiyay August 1, 2012, loona gudbiyayay Golaha Shacbiga Siibtambar 7, 2012, Qoddobka 10 9C, (1d).

⁵ Koller, Thurer/Dafflon,Ehrenseller/Pfisterer/Waldmann. Principles of Federalism, Zurich/St. Gall 2012, p.38.

⁶ Waana in xuduudaha dawladdaha Xubinta ka ah Federaalka si wanaagsan loo qeexaa.

⁷ Koller, Thurer/Dafflon,Ehrenseller/Pfisterer/Waldmann. Principles of Federalism, Zurich/St. Gall 2012. Qaybta B ee Qoraalkani wuxuu tilmaamayaa “Mabaadii’da Federaalka”.

madaniga ah iyo kuwa sharciga adeegsada si ay dib ugu qiimeeyaan, isbeddel ugu sameeyaan amd dib ugu dhisaan nidaamyada siyaasadeed. Soomaaliyawaxay u tari karaan hagitaanadani in la sameeyo nidaam dawlad federal ah oo soomaaliyeed.

Aqoon badan iyo waaya-aragnimo la xidhiidha federaalka waxaa kale oo laga heli karaa “Madasha Federaalada” (“Forum of Federations”) . Madashaa Federaaladu waa hay’ad caalami ah oo dawladnimada ku lug leh. Waa isku-xir waxbarasho oo ujeedadeedu tahay in ay horuumariso wax kala barashada dawladaha ee la xidhiidha caqabadaha dawladnimada ee heerarka kala duwan ee dalalka diimuqraadiga ah⁸. Madashaa Diimuqraadiga ihi uma ololeyso in la qaato qaab gaar ah oo dawladeed. Waxay soo bandhigtaa habab la soo tijaabiyay iyo isbarbar-dhigooda, isku-xidh khubaro oo caalami ah iyo in fursad wanaagsan loo helo la

xidhiidhka saraakiisha dawladaha ee muhiimka ah ee caalamka oo dhan. Waxay ka taageertaa dhisidda diimuqraadiyadda dawladaha iyo gobolada jilicsan ee ku jira xaalad ay markaa uun dagaal ka soo baxeen (Post-conflict situation).

Waxaa jiraa ilaa 25 dal oo federal ah dunida maanta, kuwaasoo marka laysku daro ay ku nool yihiin boqolkiiba 40 dadweynaha adduunka⁹. Waxaa ka mid ah dalalka diimuqraadiyadaha ugu waaweyn uguna kakan qaarkood. Nidaamkooda dawladeed, inkastoo uu noqon karo mid kakan, wuxuu ka dhigay federayshano badan dalalka ugu barwaaqada badan dunida qaarkood isla markaana leh adeegyo xukuumadeed oo heer sare ah. Fikradaha mataana ah ee federaalka iyo furfuraanta (decentralization) waxaa iyaguna adeegsada dalalka Soomaaliya la jaarka ah. Sida uu dhigayo Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Diimuqraadiga ah ee Itoobiya, dalku waa federayshan u qaybsan sagaal Dawlad Goboleed oo ku salaysan qawmiyad-luqad (ethno-linguistic). Dastuurka Kiiniya wuxuu ku saleysan yahay nidaamka dawladeed ee aadka u furfuran (devolution)¹⁰. Awoodaha. Xilalka iyo maaliyaddabaa waxaa loo wareejiyaa goboladooda loo yaqaan ‘counties’. Xukuumadaha goboladaasi waxay ku saleysan yihiin mabaadii’da diimuqraadiga ah iyo kala saarka awoodaha. Gobol waliba wuxuu leeyahay xukuumad Goboleed, kaasoo ka kooban Baarlamaan Goboleed iyo Fulinta Gobolka¹¹.

Federaalka Soomaaliya¹²

Marka la eego dawladnimada Soomaaliya, Federaalku waa arrin aad ugu cusub. Waaya aragnimada dawladeed ee jirtaa waa mid taariikhdeedu ku eg tahay 25 sanno ka hor waana mid lagu hoos noolaa nidaam awoodiisu si xoog ah u urursan tahay oo milatari, oo ah hantiwaddaaggii xukunkii Siyaad Barre. Markii la qoray Dastuurka ku Meel Gaarka ah ee 2012¹³ Somalia waxay sameysay bilow cusub oo lagu dhisayo dawladnimo dalka oo dhan gaarsan oo Jamhuuriyad Federaala ah. Dastuurka ku Meel Gaarka ihi wuxuu dhigayaa fikradaha aasaasiga ah ee Federaalka, fikradahaasoo imminka u baahan in ay in lagu qaabeeyo laguna saleeyo Dastuurka, sharciga iyo siyaasadaba. Marka la dhisayo federal, fahamka dawladnimada ayaa ah mid muhimad gaar ah leh sbabtoo ah unugyada uu ka kooban yahay waa dawladaha. Dawladda waxaa qeexaya xadkeeda, dadweynaha ku nool iyo sida ay u habeyso awoodeeda¹⁴.

Raad-raaca xaaladda ay Soomaaliya ku dhisayso nidaamkeeda federal waa mid kakan oo aan liicliicaya. Tan iyo markii la riday xukunkii Barre, ka dibna ay burbureen qaababkii dawladdiyo

⁸ The Global Network on Federalism and Devolved Governance: www.forumfed.org.

⁹ Dalalkan soo socdaa waa: “Xubnaha Madasha ee Dalalka Federaalka ah”: Australia, Brazil, Canada, Ethiopia, Germany, India, Mexico, Nigeria, Pakistan iyo Switzerland.

¹⁰ Nidaamka Furfuran ee Dawladnimo ee Kenya waxaa si buuxda u qoray: Rocaboy Ivor/FrancoisVaillancourt/Rejane hugounenq, Public Finance and Local Government in Kenya, Qoraalka: Bernand Daffjon/Thierry Madies (Eds.), The Political Economy of Decentralization in Sub Sahara Africa, African Development Forum Series, The World Bank, Washington, and the Agence Francaise de Developpment, Paris, 2012.

¹¹ Constitution of Kenya, Revised Edition, 2010, Articles 174, 175, 176.

¹² Cutubka A.3, Dominik Langenbacher, Safiirka Switzerland u fadhiya Somalia, ayaa ku sharraxaya jowiga siyaasadeed ee Dawlad-dhiska Federaalka ee Somalia lagu yagleelayo.

¹³ Dastuurka ku Meel Gaarka ah, Cutubka 5: Hoos u Dejinta Awoodda Dawladeed ee Dawladda Federaalka Somalia.

¹⁴ Shuruudahani wii kuwii caadiga ahaa ee Dawladnimada: Raic, Statehood and the Law of Self Determination, The Hague 2002. P.58.

maamulkii dhexe, sannadkii 1991, Goboladdii iyo Degmooyinkii iyo, tan iyo sannadkii 2000, Dawladdii ku Meel Gaarka ahayd ee Muqdisho ka dhisnayd, waxay dhammaantood u shaqeynayaan si aan isku xirnayn dawladdnimada ahaan iyo hay'ado ahaan. Awoodda habeynta iyo xilkii dawladdnimada labaduba way ka guureen hay'adihii xuduudeed ee gobolada iyo degmooyinka, waxayna u wareegeen qabiilkii. Sannadihii sagaashameeyaddii, Somaliland iyo Puntland waxaa la sameeyay dawlado aan lahayn xuduudo iyo dhul cayiman. Dawladda ahaan, Puntland waxay isu aragtaa qayb ka tirsan Soomaaliya, Somalilandse sidaa isuma aragto. Sannadkii 2012, Dastuurka ku Meel Gaarka ihi wuxuu dib u soo rogay xad ama dhul cayiman oo ka kooban laba gobol iyo wixii ka badan in ay tahay shuruudda dawlad goboleed Xubin ka noqon karto Federaalka Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya¹⁵. Markaa ka dib, Dawladda Khaatumo, oo laga abuuray qaybo aan qeexneyn oo ka tirsan laba Gobol oo ay sheegtaan Somaliland iyo Puntland labaduba, si qabiil ku dhisan, ayaa iyana dooneysa in ay noqoto dawlad ku biirta Federaalka. Bartamaha Soomaaliya, Galmudug ayaa iyana dooneysa in ay ku biirto Federaalka iyadoo qaybo ka mid ah dhulkeeda Woqooyi ay sheeganeyso Puntland si ku dhisan qabiil. Dawlad kale oo Gobol ku saleysan ayaa iyana lagu tala jiraa in la dhiso Bartamaha Soomaaliya, iyadoo maqaamka Gobolka Banaadir, oo Muqdisho ay tahay caasimaddii, ay u baahan tahay in la caddeeyo. Dhinaca Koonfurta, Jubbaland iyo Dawladda Koonfur-Galbeed oo labaduba ah Dawladdo Xubin ka ah Federaalka oo leh maamulo ku meel gaar ah ayaa ka soo baxay, kuwaasoo ku saleysan dhul ka kooban min saddex Gobol. Waxay haatan dhisnayaan hay'adahoodu dawladdnimada. Caqabadda ka hor imanaysa sidii Soomaaliya loogu sameyn lahaa nidaam dawladeed oo federal ah waxay noqoneysaa isu keenidda Dawladdaha Xubinta ka ah Federaalka, 18kooda Gobol iyo 93da Degmo, ayna iskaashi ula sameyn lahaayeen Dawladda Federaalka Soomaaliya, iskaashigaasoo ku dhisan dhul oo aan qabiil ku saleysneyn.

Federaalku waa in uu horseedaa midnimo qaran isagoo adeegsanaya u kala qaybinta awoodaha Dawladda Federaalka ah iyo Dawladdaha Xubinta ka ah Federaalka. Waa in uu sugaa nabadgelyo ku wada-noolaanshaha dadka, isagoo isla markaana aqoonsanaya kala duwanaanshaha. Soomaaliya qawmiyad ahaan waa isku mid oo ma kala duwana inkastoo "kala duwanaanshaha bulsho uu leeyahay miisaankiisa oo uu siyaasadeeyo hadba halka lagu abtirsado iyo qaybsiga khayraadka oo labaduba ka la jaan qaada fikirka qabiilka¹⁶.

Qaadashada nidaamka federaalku Soomaaliya wuxuu ka rarayaa habka aan rasmiga ahayn ee awoodda loo qaybsado ee haatan jira ee ku saleysan qabiilka wuxuuna u rari doonaa qaabka Dastuur ee rasmiga ah oo ah mid ku dhisan federal ku saleysan dawladdo.

Nidaam siyaasadeed oo federaali ah waxaa laga filan karaa in uu dawladda u dhoweeyo dadka uuna ilaaliyo midnimada iyo xasiloonaada. Haseyeesheee, marka uu hannaanka dawlad-dhisidda ee Federaalka ihi sii qoto dheeraadoba, fursadda uu ku dhalan karo khilaafka dawlad dhexdeeda ah ama dawladdo u dhexeeyaaba, si go-goos ah ayuu u badan karaa. Guud ahaan arrintaasi waa mid la aqoonsan yahay, haseyeeshee dib-u-heshiisiinta bulsho iyo tan siyaasadeed ee daruuriga ah in uu noqdo dariiqii loo adeegsan lahaa, waxaa dhici karta in muhimadiisa iyo mudnaantiisa layska hawl yareysto. Intaa waxaa dheer, wargelintii dadweyne iyo doodaha la xidhiidha federaalka ee Soomaaliya sida weyn ugu baahan tahay ilaa iyo imminka lama bilaabin¹⁷.

Iyadoo la raacayo ujeedooyinka Higsiga 2016 iyo Ujeedooyinka Dhisidda Nabadda iyo Dawladdnimada (Peace and State Building Goals [PSG] ee Heshiiska Cusub, Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya waxay xoog badan saartay dhismaha nidaamka dawladeed ee federaalka ee Soomaaliya – shaqo ahaan iyo waqti ahaanba. Marka laga yimaaddo dhismaha-hay'adeed ee dawladdnimada ee heerka Dawladdaha Xubnaha ka ah Federaalka. Gobolada iyo Degmooyinka,

¹⁵ Dastuurka ku Meel Gaarka Soomaaliya, Qoddobada 48 iyo 49.

¹⁶ Zoppi, Federalism: A valid Instrument for Reconciliation in Somalia? Wardheer News, 2013, p. 6.

¹⁷ Heritage Institute for Policy Studies, Federal Somalia: Not if but how, policy brief 02/2015, www.heritageinstitute.org. Sida uu sheegay Afyare Cilmi, Hab midnimo oo ku slaysan nidaam furfuran: Xal Dhexe oo Soomaaliya isugu Iman Karto, Arab Centre for Research and Policy Studies, May 2015, Hab furfuran oolagu midoobaa wuxuu noqon karaa nidaamka dawladeed ee ugu haboon Soomaaliya.

federaalku wuxuu si gaar ah u saameynayaa hawlaha loo baahan yahay in la dhammeystiro ee la xiriira diyaarinta qabashada doorashooyinka 2016.

Marka la dhiso federaalka, dhulalka Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka ayaa noqonaya qaybaha ugu muhiimsan ee ka hooseeya heerka qaran. Dhinaca Fulinta ee labada heer, kan Dawladda Federaalka Soomaaliya iyo kan Dawladaha Xubinta ka ah Federaalkuba nidaamka federaalku wuxuu saameyn ku yeelan doonaa habeynta xilalka ay kala leeyihiin ee ay ka midka yihiin arrimaha muhiimka ah sida ammaanka, caddaaladda, hay'adaha dhaqaale, khayraadka iyo maaliyadda, iyo bixinta adeegyadda ay ka midka yihiin caafimaadka iyo waxbarashada. Mabaadii'da iyo ku dhaqanka nidaamka federaalku wuxuu u baahan yahay in sidaa si le'eg loo waafajiyo sharciyada Baarlamaanka eek u saabsan arrimaha aynu soo sheegnay iyadoo, aakhirkana, loo baahan yahay in Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya la waafajiyo arrimahaas oo dhan, Dastuurkaasoo haatan ku jira dib-u-eegis, lana rabo in afti loo qaado mustaqbalka. Guud ahaan, isku dayga la rabo in Soomaaliya loogu dhiso nidaam dawladeed oo federal ah aad buu ula dhaafayaa waqtiga loo qabtay ee 2016.

T. Shanta Mabda' ee Federaalka

Shanta arrimood ee ugu waaweyn ee loo baahan yahay in uu nidaamka dawladda ee federaalka ihi saameynta ku yeesho waa kuwan:

- Qaybinta Awoodaha;
- Federaalka Maaliyadeed (Fiscal Federalism) iyo Wadaagga Khayraadka;
- Xiriirka iyo Wax-wada Qabsiga u Dhexeeya Dawladaha;
- Dawladda Hoose;
- Xiriirka Dibedda.

Qoraalkani wuxuu soo bandhigayaa mabaadii'da federaalku sida ay kala yihiin iyo ku dhaqanka wanaagsan ee federaalka, qoddobada kala duwan ee Dastuurka ku Meel Gaarka ah ee Soomaaliya iyo hababka kala duwan ee u bannaan in loo raaco dhismaha nidaam federal ah oo Soomaaliya. Qoraalkani wuxuu xoogga saarayaa awoodaha iyo xilalka fulinta.

1. Qaybinta Awoodaha

1.1 Qaybinta awoodaha markay tahay mabda' dastuuri ah

Qaybinta awoodaha waa in laga dhigaa mid aan daah saareyn oo la arki karo, sida ay muujinayaan mabaadii'dan soo socdaa: Waa in ay noqotaa arrin aan mugdi ku jirin oo salka ku haysa kuna dhidban Dastuurka Federaalka ah iyo weliba dastuurada Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka¹⁸. Qaybinta awoodaha macnaheedu waa u kala qaybinta, wadaagga iyo gacan ku haynta awoodda xukuumadda iyo weliba wax-wada qabsiga iyo tartanka heerarka kala duwan ee xukuumadda, oo kala Xukuumadda Federaalka ah iyo xukuumadaha Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka. Qaybinta awoodaha (kala saarka awoodaha) waxaa kale oo loo adeegsadaa waaxyaha xukuumadda, oo kala ah fulinta, sharci dejinta iyo garsoorka. Xukuumadda Federaalka ihi waa in ay ku ekaataa oo keliya hawlaha u baahan in loo sameeyo qawaaniin isku mid ah (uniform regulations) ama hawlaha dawladaha xubinta ka ah federaalku aanay awoodda u lahayn in ay fuliyaan. Mar walbana, heerarka kala duwan ee xukuumadduhu waa in midiba tan kale ku taageertaa in ay waajibaadkeeda gudato, iyagoo si wadajir ah isu xilsaaraya isla markaana xushmeynaya kala duwanaanshahooda.

Heer walba oo dawladeed waa in uu yeeshaa awood ku filan oo uu ku fuliyo hawlaha loo igmaday¹⁹. Dawladaha Xubinta ka ah Federaalku waa in ay haystaan khayraad iyo dakhli ku filan si ay u fuliyaan

¹⁸ Koller/Thurer/Dafflon/Pfisterer/Waldmann, Principles of Federalism, Zurich/St. Gall 2012, p.90.

¹⁹ Koller/Thurer/Dafflon/Pfisterer/Waldmann, Principles of Federalism, Zurich/St. Gall 2012, p. 100 – 101.

hawlaha lagu wareejiyay (devolved tasks).

Xukuumadda Federaalka ihi waa in ay ka soo dhalaashaa awoodeeda ku saleysan dastuurka ee meel marintoodu wanaagga u soo kordhinayaan federaalka. Awoodda Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka waxaa loo baahan in Xukuumadda Federaalka ihi ay ixtiraamto isla markaana ilaaliso. Dawladaha Xubinta ka ah Federaalku waxay sidaa si la mid ah ugu baahan yihiin in ay helaan awoodda aanay uga maarmeyn in ay hawlahooda u fuliyaan si madax bannaan ama iyagoo la kaashanaya unugyada kale ee jira. Dawladaha Xubinta ka ah Federaalku waa in ay haystaan madax-bannaani ballaaran oo ay u leeyihiin hawlaha iyaga loogu igmaday dastuurka federaalka ah ee dalka u dhisan²⁰.

Khilaafaadka ka dhex oogma dawladaha dhexooda waa in, intii suuragal ah, lagu xalilaa wada tashi iyo dhexdhexaadin. Haddii ay soo baxaan khilaafaad dhinaca dastuurka ah oo u dhexeeya xukuumadda federaalka ah iyo unugyada federaalku ka kooban yahay, waa in la helaa nidaam federal oo dastuurka dib loogu eegayo²¹.

1.2 Tilmaamaha Soomaalida

Machadka Hiddaha ee Daraasaadka Siyaasadda (The Heritage Institute for Policy Studies) wuxuu sheegay in aqlabiyad weyn oo Soomaali lagu wareystay daraasad laga qaaday shan magaalo oo waaweyn ku yaal Soomaaliya inay taageersan yihiin nidaamka dawladeed ee federaalka ah, sababtoo ah wusuu sahlayaa in awoodda ay wadaagaan qabaa'ilku, wuxuuna keenaya madax-bannaani goboleed aakhirkana wuxuu horseedayaa yareynta dagaalada iyo khilaafaadka²².

Qoddobka 50 (b), (t) iyo (j) ee Dastuurka Federaalka²³ ihi wuxuu dhigayaa in heerarka kala duwan ee dawladdu u hoggaansamaan saddexdan mabda' ee federaalka ah ee soo socda:

(b) Heer walba oo dawladeed waa in uu helaa kalsoonida iyo taageerada dadka: Hay'adaha iyo qaababka siyaasadeed waa in ay ku saleysnaadaan sharciga ayna noqdaan kuwo qayb ka ah nidaamka dawladeed ee federaalka ah. Dawladda Federaalka ah, Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka iyo Degmooyinku waa in ay leeyihiin hay'ado go'aan qaadasho leh oo si diimuqraadi ah lagu doortay.

(t) Awoodda waxaa la siinayaa heerka xukuumadda ee u muuqda in uu yahay kan sida ugu wax ku oolsan awoodda u maamulaya: Qoddobka 54 ee Dastuurka ku Meel Gaarka ah wuxuu dhigayaa in arrimaha dibedda, difaaca qaranka iyo muwaadinnimada iyo socdaalka iyo welib arrimaha maaliyadda inay dhammaan yihiin awood iyo talo uu leeyahay federaalku. Sida awoodaha kale loogu qoondaynayo Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ama Dawladaha Xubnaha ka ah Federaalka waa in wada xaajood laga gala ayna heshiis ka gaaraan Xukuumadda Federaalka ah iyo Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka.

(j) Jiritaanka iyo sii waarista xiriir iskaashi iyo istaageeris ku dhisan oo ka dhexeeya xukuumadaha Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka, iyo mid ka dhexeeya xukuumadaha Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka iyo Xukuumadda Federaalka, oo ku dhisan dareen waddaniyadeed:

Xiriirka ka dhexeeya dawladdu waa in uu ku dhisanadaa wax-wada qabsi u dhexeeya Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka iyo Dawladda Federaalka Soomaaliya. Iskaashiga badanaa waxaa lagu gaaraa wax-wada qabsi. Wax-wada qabsigu wuxuu tilmaamaa is-xushmeyn iyo is-xakameyn sahlaya in meeliba meesha kale u oggolaato in ay is-cabbirto doorkeedana ay qaadato. Xukuumadda Federaalka ihi waa in ay ku kalsoonaataa Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka, dhinacoodana Dawladaha Xubinta ka ah Federaalku waa in ay danahooda ka dhigaan kuwo la jaan-

²⁰ Koller/Thurer/Dafflon/Pfisterer/Waldmann, Principles of Federalism, Zurich/St. Gall 2012, p. 101.

²¹ Koller/Thurer/Dafflon/Pfisterer/Waldmann, Principles of Federalism, Zurich/St. Gall 2012, p. 102.

²² Heritage Institute for Policy Studies, Federal Somalia: Not If but How, Policy Brief02/2015, www.heritageinstitute.org.

²³ Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka ah ee ku Meel Gaarka ah. Waxaad kaloo eegtaa Qoddobada 51 – 54.

qaada Xukuumadda Federaalka ah. Shucuurtaa wax wada qabsiga ku dhisan waxay wax ka tarayaan xalinta khilaafaadka, xalalkaasoo ay haboon tahay in lagu sameeyo wada-xaajood iyo dib-u-heshiisiin²⁴.

Saddexdaa mabda'ee Dastuurka ku Meel Gaarka ihi dhigaya waxay si toos ah u muujinayaan hagitaanada dhaqamada wanaagsan ee federal. Waxay ka caawimayaan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed in ay abuurto haykaladeeda dhinacyada sharciga, hay'addo sameynta iyo nidaam abuurka, kuwaasoo dhidibaddu ugu aasan yihiin Dastuurka iyo xeerka.

1.3 Khiyaaraadka kala Duwan ee la Qaadan Karo

In si cad awoodaha loogu qaybiyo Xukuumadda Federaalka ah iyo Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka waa arrin daruuri ah oo aanu ka maarmin federal. Sida ku cad qoraalka "Hagitaanada Dhaqamada Wanaagsan ee Federaalka" qaybinta awooduhu waa in ay noqotaa mid aan madmadow ku jirn oo ku saleysan Dastuurada Federaalka iyo kuwa Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka. Waxaa arrin walba ka sii muhiimsan in aan awood qaybsiga loo deyn oo lala sugin go'aan-qaadasho siyaasadeed oo arrin walba goonideed loo eego.. Haseyeeshee, Dastuurka Soomaaliya waa ku meel Gaar, wuxuuna ku jiraa dib-u-eegis, Dawladdaha Xubinta ka ah Federaalkana weli si sharci ah looma aasaasin. Markay xaaladdu sida tahay, mabaad'iida iyo ku dhaqanka wanaagsan ee federaalka ayaa si toos ah u hagi kara Xukuumadda Federaalka ee Soomaaliya maadaama ay ka ciyaareyso door hormuud ah sameynta nidaamka dawladnimada federaalka ah ee Soomaaliya.

1.3.1 Wadajirka Qaranka (Integrity of the Nation)

Marka la habeynayo awoodaha federaalka, xilka aasaasiga ah ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waa in uu noqdaa in ay ilaaliso wadajirka iyo dabeecadda ama qaabka federaalka ah ee Qaranka. Xukuumadda Federaalka ah ee Soomaaliya waa in ay dhiiri gelisaa wanaagga guud iyo danaha la wadaago ee federaalka iyo Dawladaha Federaalka Xubinta ka ah ee jira, kuwa ku meel gaarka ah iyo kuwa sameysmayaba.

1.3.2 Federaalku waa nidaam dawladnimada meel walba taabanaya (Cross Cutting Issue)

Xukuumadda Federaalka Soomaaliyeed waa in ay Federaalka u aragtaa in uu taabanayo ama isga gudbayo arrimaha oo dhan. Xukuumadda Federaalka ah, gaar ahaana Fulinteedu waa in ay xisaabta ku darsato in Federaalku uu saameeyo ficlan dhammaan dhinac walba oo ka mid ah waajibaadka iyo adeegyada dadweyne. Awoodaha iyo maamulada Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka waxaa loo baahan yihiin in Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ay xushmeyso. Doorka aasaasiga ah ee Dawladda Federaalka Soomaaliya waa in ay kormeerto in Dawladaha Xubinta ka ah Federaalku ay u dhaqmeen si waafaqsan heshiiskii lagu qaybiyay awoodaha iyo xilalka, iyo sharciga federaalka. Haddii aanay sidaa u dhaqmin waa in ay qaaddo tallaabooyin lagu sugayo in ay sidii la rabay u dhaqmaan. Tallaabooyinkaasi waa in ay noqdaan kuwo ku haboon halka khilaafku ka yimi, marka la eego nooca tallaabada iyo heerka ay gaarsan tahayba.

1.3.3 Xidhiidhada iskaashiga ku dhisan (Collaborative relationships)

Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waa in ay la sameysataa xidhiidho iskaashi ku dhisan Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka. Shirar wada tashi oo joogto ah waa in loo diyaariyaa hoggaamiyayaasha labada heerba ee Xukuumaddaha/Madaxweynayaasha²⁵ iyo Fulinta/Wasiirada²⁶.

1.3.4 Dhisidda Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka

Qayb muhiim ah oo Federaalka ka mid ihi waxay ku saleysan tahay in Dawladaha Xubinta ka ah

²⁴ Qoddobka 50 (r) ee Dastuurka ku Meel Gaarka ah soomaaliya.

²⁵ Qoddobka 52 ee Dastuurka ku Meel Gaarka ah soomaaliya; Madasha Hoggaamiyayaasha.

²⁶ Qoddobka 52 Dastuurka Ku Meel Gaarka Soomaaliya; Nuspliger, Qoraalkiisii " Shirweynaha Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka", hoos.

Federaalku ay xor u yihiin sida ay isu habeynayaan. Dhisidda Hay'adaha ee Dawladaha Xubinta ka ah Federaalku waa nidaam kakan oo waqtigiisa u baahan. Jilayaasha cusub ee siyaasadeed iyo shaqaalaha maamulkaba waa in la tababaraa. Waxaa intaa sii dheer, in lagu daro qaababka cusub ee haydeed nidaamka dawlad-dhisku waa arrin muhiim ah oo saameyn ku leh sida guul loo hanan karo.

2. Federaalka maaliyadeed iyo Wadaagga Khayraadka²⁷

2.1 Federaalka maaliyadeed waa u muhiim federaalada oo dhan

Xukuumadda Federaalka ah iyo xukuumadaha Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka waa in ay leeyihiin ilo dakhli oo ku filan si ay kharash ugu helaan hawlhooda. Adeeg walba oo dadweyne waa in ay kharashkiisa bixisaa heerka dawladeed ee ugu dhow in uu adeegaa u siiyo sida ugu wanaagsan dadka halkaa deggan. Xukuumadda Federaalka ihi waa in ay siisaa Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka imkaaniyaad maaliyadeed oo weyn oo ay iyagu iska leeyihiin.

Iyadoo la raacayo xad uu sharcigu dhigayo, xukuumadaha Dawladaha Xubinta ka ah Federaalku waa in ay awood u yeeshaan in ay go'aansadaan oo soo rogaan cashuuro si ay ugu noqdaan ilahooda dakhliga.

Haseyeeshee, lacagahaa la soo wareejinayaa waa in aanay noqon kuwo u beddela oo u gala halkii cashuurta ay qaadeyso xukuumadda qaranka ka hooseysaa. Lacagaha la dirayaa waa in ay noqdaan kuwo daah furan kuna saleysan shuruuddo cad²⁸ oo aan marba sidii la doono loo dhigeyn.

2.2 Tilmaamaha Soomaalida

Qoddobka 50 ee Dastuurka ku Meel Gaarka ah wuxuu qorayaa mabaadii'dan soo socota:

(x) Qayb walba oo ka tirsan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay ka heleysaa dawladda heerar adeeg oo la mid qaybaha kale iyo heer taageero dawladeed oo la mida kuwa qaybaha kale:

Baahiyaha Dawladaha Xubinta ka ah Federaalku way kala duwan yihiin marka la eego waxyaabaha ay sida gaarka ah u door bidayaan dadka degaan waliba, arrimo juqraafi iyo kuwo dhaqan-dhaqaale iyo nooca iyo dabeecadda alaabta iyo adeegyada sharci ahaan laga doonayo in ay bixiyaan. Tallaabooyin toosin ama sixid ah oo lagu saxayo sinaanta maaliyadeed ayaa dabooli kara farqiyadaa aynu soo sheegnay.

(kh) Khayraadka oo si caddaalad ah loo qaybiyo:

Xukuumadda Federaalka ihi waxay leedahay imkaaniyaad loo hayo in lagu taageero Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka. Lacagta ay u wareejiso Xukuumadda Federaalka ihi Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka waa in ay ku saleysnaataa shuruudo si mawduuci ah loo cabbiri karo oo aan cidna u eexaneyn, waana in aanay ku xirneyn cidda siyaasadda dawladda u daacad ah, ama duruufo deegaameed. Lacagahaa la wareejinayaa waa in aanay noqon mid beddesha, oo gasha halkii cashuurtii Dawladda Xubinta ka ah Federaalka.

(d) Xilka cashuur qaadista waa in la siiyaa heerka dawladda ee ugu dhow in loo adeegsado sida ugu wax ku oolsan:

Guud ahaan, Xukuumadda Federaalka ihi waxay ururisaa cashuur ka qayb qaadata horuumarinta dhaqaale iyo cashuuraha iibabka waaweyn kuwaasoo suga in la helo midnimo dhaqaale oo wadajir ah. Cashuuraha waa in habka loo xisaabinayaa uu ku fadhiiyaa shuruudo ay ka mid yihiin khayraadka

²⁷ Koller/Thurer/Dafflon/Waldmann, Principles of Federalism, Zurich/St. Gall 2013, p. 103-106; Dafflon, The political economy of decentralization: Fiscal Federalism in practice, Conference on IGAD Economies and Federalism in Somalia, 23-25 October 2014, Addis Ababa, Ethiopia.

²⁸ Wareejinta lacagtu waa in ay sida badan ahaataa mid aan shuruudi ku xidhnayn si loo ixtiraamo in Dawladaha Federaalka xubinta ka ah ay u madax bannaanaadaan kharashyadooda. Wareejimaha gaarka ah ee shuruuduhu ku xiran yihiin waa in ay ku koobnaadaan siyaasadaha caamka ah ee xukunkooda la furfuray, marka ay Dawladda Dhexe rabto in ay dhiiri gelin/abaal-marin siyaasadeed sameeyso.

la filayo in la helo iyo baahida kharashaadka la gelayo iyo sicirada aan la bed-beddeli Karin. Weliba waa in aanay yeelan qaab ah kabis deymo hore loo bixiyay.

Qoddobka 122 ee Dastuurka ku Meel Gaarka ah wuxuu dhigayaa in mabaadii'da maaliyadda caamka ah loo baahan yahay in ay ka wada hadlaan Xukuumadda Federaalka ah iyo Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka iyadoo la raacayo tilmaamaha ku qoran dastuurka.

2.3 Khiyaaraadka la Qaadan Karo

Tilmaamaha ugu waaweyn ee federaalka maaliyadeed iyo wadaagga khayraadka waa in lagaga wada hadlaa shirar wada tashi oo dhexmara hoggaamiyayaasha Xukuumadda Federaalka ah iyo hoggaamiyayaasha Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka ee jira, ku meel gaarka ah iyo kuwa abuurmayaba, iyadoo mabaadii'dan soo socota xisaabta lagu darsanayo²⁹.

2.3.1 Ka Faa'iideysiga Khayraadka Dabiiciga ah

Ka faa'iideysiga khayraadka dabiiciga ihi waa arrin weyn oo kakan. Dalalka badankooda, khayraadka dabiiciga ah "si gaar ah looma leh", waxaase gacanta loo geliyaa "dawladda" – waxay noqon kartaa dawladda qaranka ama mid ka hooseysa. Waqtigan Soomaaliya. Xukuumadda Federaalka Soomaaliya iyo Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka waa in lagu daraa heshiisyada la xiriira soo saaridda khayraadka macaadiinta marka lala gelayo shirkadaha shisheeye, sida baatrootka, ama la diyaariyaa heshiisyo ku saabsan wadaagga wax soo saarka. Dakhliga ka soo baxa khayraadka dabiiciga ah waa in si lagu qanci karo ay u wadaagaan Xukuumadda Federaalka ah iyo Dawladda Xubinta ka ah Federaalka ee khayraadka laga soo saaray dhulkeeda. Kharashyada ka yimaadda soo saarka waa in si buuxda loo magdhebaa. Kharashyadaa waxaa ku jira kuwa ku baxaya mushahaaroyinka saxa ah iyo xaaladaha shaqo ee shaqaalaha iyo wixii tallaabooyin la qaadayo si loo ilaaliyo degaanka.

2.3.2 Lacagta La Wareejiyo (Financial Transfers)

Lacagaha ay u wareejiyo Xukuumadda Federaalka ihi Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka waa in ay ka taageeraan in ay buuxiyaan farqiga ama is-dhinka miisaaniyadda ee ka soo dhex baxa fulintii xilalka loo igmaday iyo dakhliga. Habka loo xisaabinayo lacagaha la wareejinayaa waa in uu ku saleysnaadaa shuruudo ay ka mid yihiin khayraadka la filayo in la helo.

Kala duwanaanshaha cashuuraha degaamada kala duwan waxaa sabab u ah haddii meeli leedahay khayraad dabiici ah (macdan, baatroot) amase xaalad juqraafi oo u sahaha horuumar dhaqaale. Tusaalaha hore, waa su'aal furan in dakhliga ka yimaadda soo saarka khayraadka dabiiciga la siman yahay iyo haddii kale. Tusaalaha labaad, sinaansha abuurka (equalization) ayeey tahay in xuquuq dheeraad ah Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka ee awoodooda dakhli ay yar tahay.

2.3.3 Cashuuraha

Dawladaha Xubinta ka ah Federaalku waa in aanay qaadan cashuuro caqabad ku noqonaya ganacsiga xorta ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Dhinaca kale, waa in aanay jirin wax cashuur ah oo Xukuumadda Federaalka ihi ka qaadata suuqyada degaamada.

²⁹ Bernard Dafflon, The political economy of decentralization: fiscal federalism in practice, HESPI Conference on Federalism in Somalia, 23-25 October 2014, Addis Ababa, p.13.

3. Xiriirka iyo Iskaashiga Dawladaha ka Dhexeeya

3.1 Wada Shaqaynta Dawladaha ka Dhaxaysa

Xiriirka ka dhexeeya Xukuumadda Federaalka iyo xukuumadaha Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka maaha mid maamul, waa xiriir dawlado dhexdood ah dabeecad ahaan.

Xiriirka dawladaha dhexdooda ah iyo iskaashigooda waa in laga dhex abuura Xukuumadda Federaalka ah iyo xukuumadaha Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka. Abuuritaanka haykal shaqo iyo mid sharci oo si wanaagsan u taabba qaada oo la xiriira xiriirka iyo iskaashiga xukuumadaha dhexdooda waxaa loo arki karaa ‘dufanka ama saliidda’ sahli karta dhaqaajinta injiinka nidaamka federaalka ah. Xiriirka wada shaqneed ee xukuumadaha ka dhexeeya waxaa loo fahmi karaa isku-xidh jilayaal isku xiran ikuna tiirsan oo ka kooban labada heer ee Xukuumadda Federaalka ah iyo Dawladsaha Xubinta ka ah Federaalka. Xiriirka xukuumadaha ka dhexeeyaa wuxuu koobayaa dhammaan falgalada rasmiga ah iyo kuwa aan rasmiga ahayn, kan u dhexeeya laamaha sharci sameynta iyo fulinta ee heerarka kala duwan ee xukuumadda³⁰. Xiriirka xukuumadaha ka dhexeeyaa waa in uu weliba la ku lug yeeshaa fulinta xilalka federaalka iyo sharciga federaalka.

Xiriirka xukuumadaha u dhexeeya iyo iskaashigoodu waa in loo habeeyaa qaab hay’adeed iyadoo la raacaya nidaam sugaya ka qayb qaadashada Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka inay lug ku yeeshaan go’aan qaadashada xukuumadda federaalka ah, taasoo ay ku jirto hannaanka qoraalka sharciyada federaalka ama wax ka beddelka dastuurka federaalka ah. Waxay muhimad gaar ah leeyihiin marka awoodaha iyo xilalka Xukuumadda Federaalka ah iyo Dawladaha Xubinta ka ah Federaalku aana kala soocnayn oo ay wadaagaan xukunka (overlap in shared rule.)

3.2 Tilmaamaha Soomaalida

3.2.1 Fulinta

Qoddobada 51 iyo 52 ee Dastuurka Federaalka ee ku Meel Gaarka ah waxay dhigayaan in xiriir iskaashi ku disani dhex maro Xukuumadda Federaalka ah iyo Dawladaha Xubinta ka ah ah Federaalka, haddii ay ahaan lahaayeen kuwa siyaasad ahaan isku heerka ah ama heerarka kala duwan. Marka ay noqoto dhinaca Madaxweynayaasha iyo sraakiisha sare ee fulinta, waxaa lo diyaarinayaa kulamo ay kaga wada hadlaan arrimaha saameeya dhulalka ay xukumaan Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka³¹. Wada hadaladaa waa in lagu daraa xidhiidhada iyo wada xaajoodka hoggaamiyayaasha dhaqanka iyo ilaalinta iyo horuumarinta xeer dhaqameedka³². Wakiilada Xukuumadda Federaalka ah iyo kuwa Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka waa in ay iyana kulmaan ugu yaraan sannadkiiba hal mar si ay uga wada xaajoodaan arrimaha qaranka³³. Qoddobadaasi waa kuwa muujinaya sida ay muhiimka u tahay in iskaashiga loo habeeyo hab hay’adseed oo rasmi ah oo u dhexeeya Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka iyo kan ka dhexeeya Dawladaha iyo Xukuumadda Federaalka ah³⁴.

3.2.2 Sharci Dejinta

Qoddobka 80 (1) (b) ee Dastuurka ku Meel Gaarka ah wuxuu qorayaa in mashruuc sharci oo heer qaran ah au soo diyaarin karaan Golaha Wasiiradu:

Federaalo badan, waaxda fulinta ee xukuumadda federaalka ah ayaa si weyn ugu lug leh hannaanka diyaarinta sharciyada cusub, hindisayaasha sharciyadaana waxaa qoraalkooda sameeya maamulka

³⁰ Koller/Thurer/Dafflon/Waldmann, Principles of Federalism, Zurich/St. Gall, p. 112; Haller, The Swiss Constitution in a Comparative Context, Zurich/St. Gall 2009, p.84.

³¹ Arrimahan soo socda ayaa laga wada hadli karaa: khayraadka biyaha, beeraha, xannaanada xoolaha, daaqa iyo seeraha, ka hortagg a nabaad-guurka, iyo ilaalinta degaanka, caafimaadka, dhallinyarada iyo waxbarashada.

³² Qoddobka 52 (1) (b) (viii) Dastuurka ku Meel Gaarka Soomaaliya.

³³ Qoddobka 51 (3) Dastuurka ku Meel Gaarka Soomaaliya: (b) Xoojinta Midnimada Qaran; (t) Ammanka iyo nabadda dalka; (j) Horuumarinta qaran ee dhaqan-dhaqaalaha, iyo siyaasadda suuqa la wadaago ee dalka; (g) wadaagga xogta.

³⁴ Qoddobka 51 (5) Dastuurka ku Meel gaarka Soomaaliya.

federaalka ah isagoo la tashanaya Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka. Marka ay arrimuhu muhimad gaar ah sii leeyihiin, fulinta waxaa gacan siiya guddiyo khubaro ah, Dastuurka ku Meel Gaarka ah kuma jiraan qoddoba hawshan diyaarinta sharciyada ku daraya in ay ka qayb qaataan Dawladaha Xubinta ka ah Federaalku. Haseyeeshee mabaadii'da iyo dhaqanka federaalka ee wanaagsan ayaa tilmaamaya in lagaga daro heerka fulinta marka uu marayo hannaankan sharci sameyntu.

Qoddobka 80 (1) (t) ee Dastuurka ku Meel Gaarka ihi wuxuu qorayaa in mashruuc sharci ay soo jeedin karaan ugu yaraan 10 xubnood oo ka tirsan Golaha Shacbiga ee Federaalku. Marka 10 xubnood oo Baarlamaanka ihi ay soo jeediyaan mashruuc Sharci, lama sii arki karo sida ay ay ugu lug yeelan karaan Dawladaha Xubinta ka ah Federaalku hannan la tashi oo ka sii horreeya soo jeedintaa. Si walba ha ahaatee, in ay hawshan sharci dejinta ku lug yeehshaan Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka ah waxay sugeysaa in Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka la ilaaliyo danahooda.

Ugu danbeyntii, Qoddobka 80 (2) ee Dastuurka ku Meel Gaarka ah ayaa qoraya in ay soo jeedin karaan mashruuc sharci Aqalka Sare kaasoo metela Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka laftooda.

Sida uu dhigayo Qoddobka (79) ee Dastuurka ku Meel Gaarka ah , mashruuc sharci wuxuu ka kooban yahay hindise qoraal sharci, oo ay ku jiraan: (b) Dib-u-eegista, beddelaadda iyo soo jeedinta wax ka beddelka Dastuurka; (t) Qorista iyo diyaarinta qoraal sharci cusub; (j) Soo jeedinta qoraal sharci cusub; (x) Dib u eegista sharci hore u jiray.

Haseyeeshee, waxaa jira weji kama danbeysta loogu soo darayo Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka: Hirgelinta Sharciga Federaalka ah³⁵.

Abuuritaanka xiriir iyo iskaashi xukuumadaha u dhexeeya oo si habsami ah u shaqaynaya oo ay ku jiraan Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka waa mid daruuri u ah diyaarinta iyo hirgelinta xilalka federaalka ah iyo sharciyada federaalka ah.

3.3 Khiyaaraadka la Qaadan Karo

3.3.1 Doorqa Hormuudka ah ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya

Dhismaha nidaam dawladeed oo federal ah oo Soomaaliya loo sameeyo wuxuu u baahan yahay tilmaan iyo jihayn qaran iyo heshiis loo dhan yahay, taasoo lagu hanan karo oo keliya hab federal oo dhinac walba taabanaya (cross-cutting) oo baahsan, isu dhammeys-tiran. Fulinta Xukuumadda Federaalka ah ee Soomaaliya ayaa leh doorqa hormuudka ah ee hannaankan. Marka uu meesha ka maqan yahay haykal sharci oo kama danbeys ah oo uu leeyahay dhismaha nidaamka federaalka Soomaaliya, hannanku waa in uu raaca oo lagu hagaaga mabaadii'da iyo dhaqamada wanaagsan ee federaalka. Hannaankaa waa in lagu daraa Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka hannaanka go'aan gaarista ee federaalka ee labada heer ee fulinta iyo sharci-dejintaba.

3.3.2 Kulamada Xukuumadaha Dhexdooda ah

Kulamo wada tashi ah oo dhex mara hoggaamiyayaasha Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka ee jira, kuwa ku meel gaarka ah iyo kuwa imminka la yagleelayo waa in la diyaarshaa kuwaasoo ah heerar Dawladaha/Madaxweynayaasha iyo Fulimaha/Wasiirada.

Heerka Dawladaha/Madaxweynayaasha, Madasha Hoggaamiyayaasha (Leadership Forum) oo uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalku bilaabay, kaasoo lagu kulmay bilihii February iyo May ee 2015, ayaa laga dhigi karaa madal qaab hay'adeed leh (institutionalized) oo noqota Shirweyne Qaran oo Joogta ah. Madashaa, tilmaamaha ugu waaweyn ee habka hay'adeed ee laysu kaashan karaa³⁶ waa Guddiga Dawladaha ka Dhexeeya³⁷ (Interstate Commission, shirweynaha sannadlaha

³⁵ Fleiner/Misic/Topperwien, Swiss Constitutional Law, La Hague 2005, 256, Article 46 of the Swiss Constitution.

³⁶ Qoddobka 51 (5) Dastuurka ku Meel Gaarka Soomaaliya.

ah ee hoggaamiyayaasha Fulinta ee Xukuumadda Federaalka iyo Xukuumadaha Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka iyo kulamada dhex mara Madaxweynayaasha Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka iyo saraakiisha sare³⁸ iyo shir mustaqbalka ah oo ay yeeshaan Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka ayaa lagu qaabeyn karaa hab waafaqsan mabaadii'da iyo dhaqamada federaalka ee wanaagsan.

Heerk Fulimaha/Wasiirada, abuuritaanka Shirweyne Joogto ah oo ay yeeshaan Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka³⁹ ayaa isna noqon kara arrin muhiim ah sababtoo ah waxay saamaxaysaa shirar mawduucodu cayiman yahay oo dhex mara Xukuumadda Federaalka ah iyo Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka . Iyadoo ku xiran hadba mawduuca laga shirayo, shirweynayaashaa wasiiradu waxaa la qaban karaa markii la doono (ad hoc) ama waxaa laga dhigi karaa shirweyne joogto ah.

Si wadajir ah, Madasha Hoggaamiyayaasha iyo Shirweynaha Dawladaha Xubinta ka ah Federaalku waxay adeegsan karaan Guddiga Dawladaha ka Dhexeeya (Inter-State Commission) iyo shirweynayaasha iyo kulamada ay dhigayaan Qoddobada 51 iyo 52 ee Dastuurka ku Meel Gaarka ah.

3.3.3 La Tashiyada Hannaanka Sharci Dejinta

Xukuumad waliba waa in ay u heelanaataa in ay xiriir iskaashi ku dhisan la yeelato xukuumadaha kale, ha ahaadeen xukuumado la heer ah ama heer kale oo xukuumadeede⁴⁰. Xukuumadda Federaalka ihi waxay ku adeegsan kartaa fikraddan aasaasiga ah ee iskaashiga hannaanka diyaarinta sharciyada iyadoo, intaanay u gudbin sharci qoraal ah Baarlamaanka, la tashaneysa Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka, heerka wasiirada/fulinta⁴¹. Wada tashigaa hore eel ala sameeyo laamaha fulinta wuxuu ku soo gabagaboobayaa hindise ay xukuumaddu u gudbiso baarlamaanka, kaasoo ka kooban hindise iyo weliba aragtiyo iyo sharraxaad ka tarjumeysa natiijaddii la tashiyada⁴².

3.3.4 Madasha Guddoomiyayaasha Baarlamaanada

Si loogu sii fidiyo xiriirka iyo iskaahiga ka dhexeeya xukuumadaha dhinaca Baarlamaanka Federaalka ah iyo Baarlamaanada Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka, waxaa la sameyn karaa Madasha Baarlamaanada kulmisa. Si loo sugo jiritaanka iyo horuumarinta xiriir federal oo iskaashi ku dhisan, baarlamaanadu waa in ay ku jiraan falgalkaa dhexmaraya heerarka kala duwan ee xukuumadda.

4. Dawladda Hoose

4.1 Dawladda Hoose waxay lama huraan u tahay in federaalku si wanaagsan u shaqeeyo

Dawlad hoose oo si fiican loo dhisay waxay daruuri u tahay in federaalku si fiican u shaqeeyo⁴³. Maamulada Dawladaha Hoose waxay muhiim u yihiin in la helo shaqo hufan oo dadweynaha maskaxda ku haysa oo ay yeeshaan xafiisyada iyo shaqooyinka dadweyne. Waa in ay maamuladdaasi abuuraa hay'ado si diimuqraadi ah loo doortay oo leh madax-bannani weyn iyo awooddii maaliyadeed ee ay waajibaadkooda ku fulin lahaayeen.

Xukuumadda Federaalka ah, Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka iyo Dawladaha Hoose waa in ay si sokeeye isu kaashadaan dhammaantood, gaar ahaan dhinacyada hawl gal ee la xiriira heerarka xukuumadaha oo dhan.

³⁷ Qoddobka 111F Dastuurka ku Meel Gaarka Soomaaliya.

³⁸ Qoddobka 51 iyo 52 Dastuurka ku Meel Gaarka Soomaaliya.

³⁹ Nuspliger, Qoraal ku saabsan "Shirweynwhw Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka", Feb. 19, 2015, p.9.

⁴⁰ Qoddobka 51 ee Dastuurka ku Meel Gaarka Soomaaliya.

⁴¹ Marka loo baahdo, Wada-tashiga waxaa loo soo rari karaa heerka Madasha Hoggaamiyayaasha/Shirweynaha Qaranka.

⁴² Dalka Switzerland, qoraalka ugu horreeya waa in la mariyaa nidaam wada tashi, halkaasoo Kantoonadu (Cantons [Dawladaha Xubinta ka ah Fed.]), xisbiyada siyaasadeed iyo kooxaha kale ee dan gaara leh ayaa lagu casumo inay aragtidooda dhiibtaan. Marka laga yimaaddo aqoonta xeel dheerayaasha la helayo, nidaamka la tashigu wuxuu fulinaya hawl qaran oo muhiim ah: in laga wada hadlo sidii meel dhexe laysugu iman lahaa. Halle, *The Swiss Constitution in a Comparative Context*, Zurich 2009, p. 317.

⁴³ Koller/Thurer/Dafflon/Ehrenzeller//Waldmann, *Principles of Federalism*, Zurich/St. Gall 2012, p. 100-113. Linder, *Swiss Democracy, Possible Solutions to Conflict in Multicultural Societies*, Second Edition, New York 1998, p. 49-52.

Khilaafka dhex mara dawladaha hoose iyo Xukuumadda Federaalka ah ama Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka waa in lagu xalilaa wada hadal ama dhexdhexaadin.

4.2 Tilmaamaha Soomaaliyeed

4.2.1 Dawladda Hoose

Qoddobka 48 ee Dastuurka ku Meel Gaarka ah wuxuu dhigayaa laba heer oo xukuumadeed: (b) Heerka Xukuumadda Federaalka ah; iyo (t) Heerka Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka, kuwaasoo ka kooban xukuumadda Dawladda Xubinta ka ah Federaalka iyo dawladda hoose.

Qoddobka 51 ee Dastuurka ku Meel Gaarka ah wuxuu dhigayaa in xukuumad walba loo baahn yahay in ay ku dadaasho in ay xiriir iskaashi ku dhisan la lahaato xukuumadaha kale, haddii ay ahaan lahaayeen isku heer ama heer kale oo xukumadeed: Dhammaan heerarka xukuumaduhu waa in ay waafaqaan dastuurka qaran, iyadoo aanay xukuumadina isa siinayn awoodo ka badan kuwa uu Dastuurku u qoondeeyay.

Waxaa intaa sii dheer, sharci uu ansixiyay Baarlamaanka Federaalka ihi ayaa la filayaa in uu habeeyo: (b) Dhismaha hay'adaha iyo hagitaanada loo adeegsanayo falgalka heerarka kala duwan ee xukuumadda; iyo (t) Asaasidda hagitaanada loo raacayo xalinta khilaafaadka u dhexeeya heerarka kala duwan ee xukuumadeed iyadoo aan maxkamad laysla tegin.

Dawlad-dhisid meel mar ah oo ay Soomaaliya heshaa waxay u baahan tahay xukuumad sharci ah, taasoo iyana ku sii xiran in la helo hannaan saamaxaya lahaansho deegaameed oo weyn kaasoo horseedaya nidaamyada isla-xisaabtan oo adag, kalsooni dadweyne oo weyn, iyo xukuumado si wanaagsan uga jawaaba baahida dadka⁴⁴.

4.2.2 Gobolada iyo Degmooyinka

Soomaaliya waxay si rasmi ah ugu qaybsan tahay 18 maamul Goboleed, kuwaasoo iyana u sii qaybsan sagaashan iyo sadde Degmo. Nidaamyada federaalka ah, maqaamka gobolada iyo degmooyinku waa arrin ku saleysan oo la xidhiidha dastuurada Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka. Waa unugyada uu ka koobmo federaalku ee ugu dhow dadweynaha. Maadaamaa Goboladu yihiin unugyo maamul, Dastuurada Dawladaha Xubinta ka ah Federaalku waxaa laga yaabaa in ay u sii odorosaan in Xukuumadda Dawladdahaasi ay magcaabayaan Badhasabyada ama Guddoomiyayaasha Gobolada

Soomaaliya, Dastuurka Dawladda Puntland ee Soomaaliya wuxuu dhigayaa in Puntland ay ku dhaqanto mabaadii' da maamulka furfuran (decentralization). Heerka Degmo, kooxaha beesha ayaa doorta Golayaasha Sharci Sameynta. Golaha Degaanku wuxuu leeyahay xilal uu ku fuliyo siyaasadaha dhinacyo ama mawduucyo kala duwan⁴⁵. Guddoomiyaha Degmada waa awoodda ugu sarreysa ee Degmada wuxuuna guddoomiyaa shirarka Degmada ee guddiyada horuumarinta iyo ammaanka. Waxaa dooran kara Guddoomiyaha Degmada Golaha Sharci Sameynta ee Golaha Degmada ama dadweynaha Degmada⁴⁶.

Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland wuxuu tibaaxayaa in maamulada Gobolada iyo Degmooyinku ay yihiin qayb ka tirsan maamulka Dawladda Somaliland. Gobolada iyo Degmooyinka Somaliland waxay leeyihiin golayaal sharci dejin, awoodooduse ay ku kooban tahay in ay ansixiyaan sharci hoosaadyo aan ka horimanayn sharciyada Jamhuuriyadda, iyo golayaasha fulinta. Guddoomiyaha Gobolka waxaa magcawda Xukuumadda wuxuuna doorkiisu yahay wakiilka xukuumadda dhexe ee Gobolka iyo Degmooyinka hoos yimaadda⁴⁷.

⁴⁴ Menkhaus, If Mayors ruled Somalia, Policy Note for the Nordic Africa Institute. May 2014: www.nai.uu.se.

⁴⁵ Dastuurka Dawladda Puntland ee Soomaaliya, 18ka April 2012, Qoddobka 81-88. Golaha Degmooyinka ayaa leh xilka fulinta.

⁴⁶ Dastuurka Dawladda Puntland ee Soomaaliya, 18ka April, 2012, Qoddobka 86.

⁴⁷ Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qoddobka 111.

4.3 Khiyaaraadka la Qaadan Karo

4.3.1 Dawladda Degmada

Tilmaamaha ugu waaweyn ee xukuumadda degmada waxaa lagaga wada hadli karaa kulamada wada tashiga ee u dhexeeya hoggaamiyayaasha Xukuumadda Federaalka ah iyo hoggaamiyayaasha Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka ee jira, kuwa ku meel gaarka ah iyo kuwa imminka la yagleelayo. Waxaa intaa sii dheer, hoggaamiyayaasha degmada waa in lagu ayna qayb firfircoon ka qaataan wada hadalada. Weji labaad waa in lagaga wada hadlaa tilmaamaha u gaarka ah xukuumadda degaanka iyo degmada, wada hadalkaasoo ay isugu imanayaan hoggaamiyayaasha Dawlad walba oo Xubin ka ah Federaalka iyo hoggaamiyayaasha degaamadooda hoose.

4.3.2 D oorshooyinka

Waxaa jira mushkilad soo dhow: Sannadka 2016, doorashooyinka qaran waa in la diyaariyaa. Haseyeeshee, doorashooyinku, kama dhacaan heerka qaran oo keliya balse heerka Dawladaha Xubinta ka ah Federaalkana way ka dhacaan. Sharci dejinta mid walba oo ka mid ah Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka ayaa laga doonayaa in ay go'aansadaan tilmaamaha iyo habka nidaamkooda doorsho kaasoo weliba khuseyn doona doorashooyinka qaran. Degmooyinka ka tirsan Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka ayaa noqon kara goobaha ama xarumaha codbixinta (constituency).

5. Xiriirka Dibedda

5.1 Dhinaca xiriirka dibedda, xilalka Federaalka iyo Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka labaduba wey soo gelayaan

Xukuumadda Federaalka ah ayaa leh masuuliyadda koowaad ee xiriirka dibedda abuuristiisa, qaabeyntiisa iyo ka shaqayntiisa. Xukuumadda Federaalka ah ayaa ah jilaha koowaad ee federaalka marka laga hadlayo xiriirka dibedda. Dawladda Federaalka ihi waa in ay si buuxda iyo waqtiga loo baahan yahay ay ku wargelisaa Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka wixii la xiriira siyaasadda arrimaha dibedda. Waa in ay ula tashataa hadba sida haboon. Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka waa in la siiyaa fursadaha ay kaga qayb qaadan karaan siyaasad-abuurka federaalka eek u lugta leh umuuraha siyaasadda arrimaha dibedda ee iyaga khuseeya⁴⁸. Waa in la sameeyaa dadaalo wanaagsan oo la xiriira in gudaha dalka laga hirgeliyo sharciyada caadi ahaan caalamku ku dhaqmo.

5.2 Tilmaamaha Soomaaliyeed

Sida uu dhigayo Qoddobka 54 ee Dastuurka ku Meel Gaarka ihi , arrimaha dibeddu waa arrin federal. Arrintan waxaa ku jirta awoodda ay Xukuumadda Federaalka ihi u leedahay in ay soo gasho heshiisyada caalamiga ah. Qoddobka 53 ee Dastuurka Federaalka ah wuxuu dhigayaa in Xukuumadda Federaaliga ah ay waajib ku tahay in ay kala tashato Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka “wada hadalada la xiriira caawimada dibedda, ganacsiga, heshiisyada, ama arrimaha kale ee muhiimka ah ee la xiriira heshiisyada caalamiga ah.” Marka wada hadaladu ay si gaar ah u saameynayaan danaha Dawlad Xubin ka ah Federaalka, wakiilo ka socda xukuumadaha Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka waa in lagu daraa wafdiga wada-hadalka gelaya ee Xukuumadda Federaalka ah. Marka lagu jiro wada –hadalka, Xukuumadda Federaalka ihi waa in ay isu aragtaa ilaalayaha danaha Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka.

Mabaadii’daa Dastuurka ku Meel Gaarka ihi waa kuwo la jaan qaadaya “Hagitaanada Dhaqanka Wanaagsan ee Federaalka”.

⁴⁸ Koller/Thurer/Dafflon/Ehrenzeller/Pfisterer/Waldmann, Principles of federalism, Zurich/St. Gall 2012, p. 144-116; Feiner/Misic/Topperwien, Swiss Constitutional Law, La Hague 2005, p 103.

5.3 Khiyaaraadka la Qaadan Karo

5.3.1 Wada Tashiga Xukuumadaha Dhexdooda

